Siyaasadda JICH-R- Isticmaalidda Aalkolo iyo Daroogo ee Ardayda

Isticmaalka

Ardayda ay ku saameeyeen ama u muuqda in ay ku saameeyeen aalkolo, maandooriye ama maadooyinka kiimikada halista ah leh ama sharci darada ah kale hantida maguurtada ah ee dugsiga ama ayagoo jooga waxqabadyada uu dugsiga oggolaadey ama inta ay saaran yihiin gawaaridda dugsiga waxaa loola dhaqmayaa habkan soosocda:

1. Haddii arday uu u muuqdo in uu soo bandhigayo dhaqan aan caadi ahayn laga yaabee inay sabab u tahay isticmaalka maadooyinka halista ah ama sharci-darada ah, xubin ka tirsan shaqaalaha waa in uu u racaa ardayga kaaliyaha caafimaadka dugisga oo go'aaminaya halis ahaanta xaaladda.

a. Haddii xaaladu ay ka dhacdo fasalka dabeecadda ardaygana ay muujiso in ardayga uusan awoodin in uu si badbaadsan ku tago xafiiska kaaliyaha caafimaadka, waa in caawimaad looga soo wacaa maamulaha dugsiga ama shaqsiyaadka uu u soo magacaabay maamulaha si ay mas'uul ugu noqdaan arrimahaasi.

b. Haddii ay xaaladu ka dhacdo dibadda fasalka ee ah goob kasta oo dugsigu awood maamul ku leeyahay, xubin shaqaalaha ah waa in uu u raaco ardayga kaaliyaha caafimaad dugsiga.

c. Haddii kaaliyaha caafimaad dugsiga uusan joogin dhismaha, habraacyada degdega ah ee caadiga ah waa in ay raacaan hawlwadeenada loo magacaabay.

d. Xubnaha shaqaalaha ee soo oggaadey soo bandhigidda dabeecadda aan caadiga ahayn waa in uu si kooban sharaxaad ugugu bixiyaa qoraal ahaan, ayagoo bixinaya taariikhda, wakhtiga iyo goobta ay ka dhacdey. Dukumeetiyada noocaas ah waxaa loo gudbinayaa maamulaha dugsiga.

2. Maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay wuxuu la xiriirayaa waalidiinta ama mas'uulka ardayga (ama shaqsiga loo magacaabay ee ku qoran kaarka degdega ah) wuxuuna kula talinayaa in ardayga uu soo bandhigayo dabeecad halis ah ama aan caadi ahayn. Maamulaha ama qofka loo magacaabay wuxuu sharaxaad ugu bixinayaa dabeecadda waalidiinta balse iskuma dayayo in uu soo saaro nooca xaaladda ardayga.

3. Haddii dammaanad-qaad iyo caawimaad xaaladda caafimaad loo baahan yahay iyo haddii xiriirka guriga aanan la sameyn karin, maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay wuxuu wacayaa 911 si gargaar loo helo. Inta la sugayo waalidiinta ama gargaar caafimaad dheeraad ah, ardayga waa in kaligiisa laga tagaa balse lagu meeleyaa xaalad degan halkaasi oo ardayga lagu ilaalinayo.

4. Haddii ardayga u baahan yahay feejignaan caafimaad degdeg ah iyo haddii kaleba, maamulaha dugsiga ama qofka loo doortay, waxaa u siidheer la xiriiridda waalidiinta ama mas'uulka, in uu raacayo habraacyada sharciga ah ee waajibka ah. Wuxuu:

a. Kala hadlayaa xaaladda ardayga si uu u aqoonsado dhibaatooyinka caafimaadka sharciga ah ee suurgalka ah in ay sabab u yihiin dhaqanka, haddii xaaladda ardayga ay u oggolaanayso.

b. Wada-hadal la yeelanayaa Waaxda Booliska Denver ama Waaxda Amniga iyo Badbaadada ee DPS.

Talaabada Anshax marinta ee la isticmaalayo

Haddii kadib baaritaanka, maamulaha dugsiga uu ku qanco in ardayga uu isticmaalayay/isticmaalay ama ay saameeyeen/ay saameynayeen aalkolo, maandooriye ama madooyinka kiimikada sharci darada ah ama halista ah ee kale, Siyaasadda JK iyo JK-R (Anshaxa Ardayga) waa in ay xakameeyaan talaabada anshax marinta ee la xiriirta dhacdada (dhacdooyinka). Talaabooyinkan soosocda waa in la qaado:

Maamulaha dugsiga ama qofka uu u magacaabay wuxuu wada-hadal la yeelanayaa waalidka ama mas'uulka iyo ardayga. Maamulaha ama qofka loo magacaabay waa in uu:

a. Dib-u-eegis ku sameeyo ikhtiyaarada anshax marinta ee la heli karo;

b. U diro ardayga xubinka shaqaalaha ee ku habboon (tusaale, shaqaale bulsho, la taliye, la taliye arday) ama wakaalad caawimaadda beesha (tusaale, adeegga la talinta qoyska, barnaamijka daaweynta daroogada, xarunta ka saaridda sunta aakoloda). U dirista waxaa raacaya talaabo kastoo kale ee daruuri ah ee xaaladda dammaanad-qaadaysa;

c. La sameeyo heshiis qoraal ahaan ah waalidiinta iyo ardayga ee muujinaya mas'uuliyadaha waalidka, ardayda iyo dugsiga oo ah dadaal loogaga hortagayo in dambiyo dheeraaad ah ay dhacaan. Waxaa siidheer in heshiiska uu si gaar ah u caddaynayo waxqabadyada waxtarka leh ee loogu talagalay ardayga inta lagu guda jiro muddada dugsi ka joojinta, haddii la adeegsan karo, iyo in uu si gaar ah u caddeeyo wakaalad loo dirayo;

Haysashada ama qaybinta

Ardayda ku haysata ama ku lugta leh iibinta, siinta ama is-dhaafsashada aalkolo, maandooriye ama maadooyinka kiimikada halista ah leh ama sharci darada ah ee kale ee hantida maguurtada ah ee dugsiga ama jooga waxqabadyada uu dugsiga oggolaadey ama inta uu saaran yahay gawaaridda dugsiga waxaa loogula dhaqmayaa habkan soosocda:

1. Xubinka shaqaalaha dugsiga ee ugu horreeya ee la kulma caddaynta iyo/ama koontrabaanka waa in uu diiwaangeliyo xaqiiqooyinka qabashada caddaynta iyo/ama koontrabaanka. Bixinta qoraalka xogta rasmiga ah waa in ay ka mid noqdaan haddii caddaynta iyo/ama koontrabaanka lagu helay ardayga asagoo haysta. Haddii ay sidaasi tahay, magaca ardayga iyo xogta kale ee la xiriirta, goobta caddaynta iyo/ama koontrabaanka laga helay, iyo xaqiiqooyinka oo kooban ee ku harreersan dacwadda waa in ay ka mid nodqaan.

2. Xubinka ka tirsan shaqaalaha ee hela caddaynta ama koontrabaanka waa in uu si degdeg ah ugu geeyo maamulaha ama qofka loo magacaabay.

3. Maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay kadib waa in ay geliyaan caddaynta iyo/ama koontrabaanka bokhshad ama weel ku habboon oo la dabooli karo. Bokhshada waa in la daboolo waana in ay wada geliyaaan labaduba xubinka shaqaalaha ee markii hore soo helay iyo maamulaha ama qofka loo magacaabay. Liiska koontrabaanka waxaa la gelinayaa bokhshad gooni ah, waana in la daboolo oona si gooni ah loo fayl loo galiyo

4. Maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay waa in uu ogeysiiyaa Waaxda Booliska Denver ama haddii mid loo xilsaaro, Sarkaalka Khayraadka Dugsiga DPD iyo Waaxda Amniga iyo Badbaadada ee DPS waana in uu ka codsado in sarkaal uu la wareego haynta caddayn iyo/ama koontrabaanka. Bokhshadan waa in si shaqsi ahaan ah ugu gacan geliyaan sarkaalka booliska maamulaha dugsiga ama

qof loo magacaabay koontrabaanka Daroogada iyo aalkolada ah waa in aan lagu haynin dugsiga. 5. Ardayda waxaa xiraysa Waaxda Booliska Denver ayadoo ujeeddadu ay tahay go'aaminta talaabada ku habboon ee dheeraadka ah. 6. Maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay waxay la xiriirayaan waalidiinta ama mas'uulka.

Talaabada anshax marinta ee loogu talagalay haysashada iyo qaybinta

Siyaasadda JK iyo JK-R (Anshaxa Ardayga) waa in ay xakamayso talaabada anshax marinta ee la xiriirta dhacdada (dhacdooyinka). Marka uu soo gaaro ogeysiiska wakaaladda sharci fulinta ku habboon ee ah in caddaynta iyo/ama koontrabaanka ay ku jiraan maandooriye ama maadooyin kiimikaad sharci-daro ah ama halis ah ee kale ama haddii haysashada aalkolada ama aalad daroogo ku jirta ay ku lug leedahay, maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay waxay dhammeystirayaan baaritaanka.

Haddii maamulaha dugsiga ay ka dhaadhacdo in ardayga uu haystay aalkolo,

maandooriye ama maadooyinka kiimikaadka sharci-darada ah ama daroogo kale oo halis ah ama aalad daroogo ku jirta ee jebinaya siyaasadda degmada, talaabada anshax marinta ee raacsan Siyaasadda JK iyo JK-R waa in la qaado, Waxaa siidheer in, talaabooyinka soosocda la qaado:

b. Ardayga waxaa sida ku habboon loogu dirayaa xubinka shaqaalaha ah (tusaale, shaqaale bulsho, la taliye, la taliye arday) ama wakaaladda caawimaadda beesha (tusaale, adeegga la talinta qoyska, barnaamijka daaweynta daroogada, barnaamijka ka saarid sunta aakolada). U dirista waxaa raacaya talaabada kale ee daruuriga ah ee xaaladda dammaanad-qaadaysa;

b. Kormeeraha guud ee waxbarashada ee ku habboon waa in sida ugu dhakhsiyaha badan loo ogeysiiyaa.

c. La sameeyo heshiis qoraal ahaan ah waalidiinta iyo ardayga ee muujinaya mas'uuliyadaha waalidka, ardayda iyo dugsiga oo ah dadaal loogaga hortagayo in dambiyo dheeraaad ah ay dhacaan. Waxaa siidheer in heshiiska uu si gaar ah u caddaynayo waxqabadyada waxtarka leh ee loogu talagalay ardayga inta lagu guda jiro muddada dugsi ka joojinta, haddii la adeegsan karo, iyo in uu si gaar ah u caddeeyo wakaaladda loo dirayo.

Bilaabidda waajibka ah ee nidaamka dugsi ka cayrinta sida ay qabto siyaasadda Guddiga, marka la adeegsan karo Siyaasadda JK iyo JK-r, waxaa la bilaabayaa dacwadaha sida qeexan loo soo caddeeyay.

La oggolaadey 1 Febraayo, 1983
La Muraajaceeyay 15 Oktoobar, 2009

TIXRAACYADA KALE EE LA EEGAYO.: JIH, Xirridda, Baaritaanka iyo Su'aalo Wayddiinta Ardayga

JKD/JKE, Dugsi Ka joojinta/Dugsi Ka Cayrinta Ardayga

KFA, Habdhaqanka Guud ee ku saabsan Hantidda Maguurtada ah ee Dugsiga

TIXRAACYADA KALE EE LA EEGAYO.: JIH, Xirridda, Baaritaanka iyo Su'aalo Wayddiinta Ardayga

JKD/JKE, Dugsi Ka joojinta/Dugsi Ka Cayrinta Ardayga

KFA, Habdhaqanka Guud ee ku saabsan Hantidda Maguurtada ah ee Dugsiga